

Qoysaska Licking Heights ee qiiimaha badan,

Waxaan kuugu soo qoreynaa warqadani inaanu ku ogeysiino in Qoondeynta Xilliga Degdegta ee SNAP lasoo afjaraayo wixii ka dambeeyo Febraayo 2023. Meeshi lagu gaaro Maars 1, 2023, dawladda federaalka ayaa afjari doonto wax lacag bixin dheeraad ee SNAP oo qoysaska helaayeen intii lagu jiray cudur faafkii fayraska.

Qoysaska helaayo SNAP ayaa heli doonaan lacag bixintoodi u qoondeysneed caadiga bilowga bisha. Laakin waxaa go'aysaa qoondeynta labaad ee bisha dhammaadkeeda.

In la fuliyo baahiyada ardaydeena iyo qoysaskeena ayaa himilo aasaasi u ah dugsiyadeena. Wuxaan ognahay in isbedelkan inuu surtgal u yahay inuu saamayn ku yeesho qoysas badan ee degmadeena iyo gobolkeena, sidaa darteeda waxaan maclumaadka u bixinaynaa sifo aan uga kaalmeyno inaanu ugu fulinno baahiyada dheeraadka oo sababtay lacag bixintan la gooyay.

The Food Pantry Network of Licking County (Shabakadda Kaydka Cunnada ee Licking County) (FPN) ayaa wax walba ka samaynayso inay ku buuxiso daloolka soo baxay ee qoysaska heli jiray lacag bixinta dheeraadka ee SNAP saddexda sanno ee lasoo dhaafay. Tani waxaa ku jiraan in lagu daro isu xiritaanka shabakado tiro badan iyo goobaha qaybinta badeecaddaha ee Newark iyo Licking County.

Sifo aad maclumaad dheeraad ah uga hesho FPN, kaydadka xubnaha ka ah, iyo adeegyada iyo qorshooyinka logu talagalay dadka haysato cunno la'aanta, fadlan wac (740) 344-7401 mise [booqo boggooda](#).

Hadii aad wax su'aalo ah ka qabtid SNAP iyo qoondeyntaada lacag bixineed, fadlan booqo bogga internetka Ohio Department of Jobs and Family Services (Waaxda Shaqooyinka iyo Adeegyada Qoyska Ohio) (ODJFS) [halkan](#).

Mahadsanid,

Dr. Kevin S. Miller, Kormeeraha Guud